JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA
WASAARADDA WAXBARASHADA
XAFIISKA MANAAHIJKA

# TILMAAME BARE AF SOOMAALI

## F. 5aad & 6aad

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA
WASAARADDA WAXBARASHADA
XAFIISKA MANAAHIJKA

# TILMAAME BARE AF SOOMAALI

## F. 5aad & 6aad

# HORDHAC

Ka dib markii la ogaaday dhibaatada macallinka ka haysata dhigaalka maaddada Af Soomaaliga waxa khasab noqotay in la siiyo tilmaamo iyo tusaalooyin haga, una fududeeya sidii uu u gudbbin lahaa qodobbada af-dhigista ee la xidhiidha casharrada buugga ardayga.

Wallow aan Af Soomaaliga lagu samayn baadhis qotadheer oo u noqota marjac xiise leh macallinka, haddana qorayaasha buugani waxay isku dayeen in ay kaalmeeyaan baraha ilaa inta ay ka siin karayaan qodobbada af-dhigista ee guud ahaan ka dhexeeya afafka.

Buuggan oo ah tilmaame bare wuxuu la socdaa buugga shanaad iyo buugga lixaad ee Af Soomaaliga.

Xafiiska Manaahijta wuxuu u mahadcelinayaa barayaashii qoray buuggan oo ahaa Axmed Cabdillaahi Boqor iyo Faarax Axmed Cali «Gamuute».

Xuseen Diiriye Jaamac

Maamulaha Xafiiska Manaahijta

# TUSMADA BUUGGA


B) Tilmaame Bare Shanaad.

1. Arar Guud.
2. Baraha iyo Barbaarinta.
3. Baraha iyo Ardayga.
4. Habaynta Buugga Shanaad.
5. Habka Dhigista.

T) Tilmaame Bare Lixaad.

1. Arar Guud.
2. Habka Dhigista.
3. Cashar Qorshayn.
4. Tusaalooyin.

# ARAR GUUD.

Buugga Shanaad iyo Lixaad waxay ku xidhiidhsan yihiin, kana sii ambaqaadayaan afartii buug ee hore ee ahaa kuwa aasaaska ama saldhigga maaddada af Soomaaliga lagu qotomiyey.

Habaynta iyo uur ku jir ahaan way ka geddisan yihiin, waayo labada buug iyo (inta ka sii dambaysaba, gudahood waxa si gaar ahaaneed loogu tixgeliyey waa akhriska iyowax qoridda.

Waa mide, Sawirada labaad buug ku yaallaa, ka ma isticmaalin sidii ujeeddooyinka badnayd ee buugtii hore loogu isticmaalay, oo sawiradoodu tirsi ahaan way ka yar yihiin, waa ta 'labaade ereyada cusub ee labada buug ku jira, way badan yihiin, waase loo kasay. waayo waxa sugnaatay in marka tirsiga ereyada ardaygu yaqaanno, uu sii kordhoba awooddiisa wax akhri iyo tiisa wax qorid ay sii siyaaddo.

Tan Saddexaad waa tii caadiga ahayd, buugba buugga uu ka heer sareeyo wuu ka adag yahay. Labadan buug (Shanaad iyo Lixaad) way k acasharro badan yihiin, ka casharro dhaadheer yihiin, kana qallafsan yihiin kuwii hore.

Kolkaa gabagabo ahaan, arrimaha kor ku xusan markaynnu maanka gelinno, waxa cad in looga baahan yahay, xagga ardayda dadaal dheeraad ah, dhanka barahana cashar diyaarin hagar la'aan iyo isxilqaan u sal yihiin, oo ka heer saraysa tii sannadkii hore.

Waxaase run ah oo aan la iska indhosaabi karin, in ardayda baruhu wax u dhigayo ee fasalka Shanaad,

ama kan lixaad ku jiraa ay isku dhex dhafan yihiin, oo ay ku kala duwan yihiin xirfadaha waxbarashada aasaaka u ah, sida: Hore u garashada ereyada daabacan, fahmadda waxay akhriyayaan iyo awoodda wax qoridda IWM.

Sababaha kala duwanaanta ama kala heer saraynta keenay, waa badan yihiin, wayna dhici kartaa in wax ka qabadka dhibaatooyinka qaarkood uu noqdo wax gacanta baraha oo uu xididkoodu noqdo mid ka soo jeeda guryahay ubadku ku koreen, waalidkood iyo mujtamacaba.

Waxaa kaloose dhici karta, waana sida ay u badan yihiin, kuwa ay ardaydu ka dhaxashay barbaarin xumo, iyo niyad jabin soo gaadhay inatay dugsiyada ku soo jireen.

Arrintu si kastaba ha ahaatee, ardaydaa mushkiladaysani dib bay u ridi karaan, ama guud ahaanba way murgin karaan xawliga caadiga ah ee waxbarasho iyo dhammaan horumarka fasalka haddii aan intooda la daawayn oo uusan baruhu danayn gaar ah siin.

Tusaale ahaan waa la odhan karaa fasalka laba ama saddex kooxood ha loo qaybiyo, oo qolo walba xawligeeda wax faham wax ah lagu baro. Hase yeeshee tallaabadaasi culayska ay la iman kartaa wuu ka weyn yahay mid baraha oo qudhi uu qaadi karo.

Waxaa se hubanti ah in daawo loo heli kari, saa baraha mas'uulka ahi, ardaydiisa dhibaataysan xilka ka saaran kama gaabsado, xalna uma waayo.

Tusaale ahaan baraha wanaagsani, siduu inta waxbarashadoodu liidato u caawin lahaa, uu niyad-

dooda kor ugu soo qaadi lahaa, kolkuu fasalka hor taagan yahay ee uu casharka gudbinaayo, iyo markuu casharka dibadda ku soo diyaarinayaba, maskaxda ayuu ku hayaa oo si joogta ah ayuu, taakulayntooda ugu soo tala gelaa, sida:

b) Xiisad kasta qaybta aan waxba akhriyayn, waxna la qorayn ee su'aalaha afka uun laga jawaabayo (oral) inay si buuxda uga qayb qaataan ayuu ku dhiirriyaa inta liidata, si ay u firfircoonaadaan oo ay isku kalsooni iyo in ay kuwa kale la siman yihiin ay u dareemaan.

t) Laylisyo badan oo kala gooni ah, oo arday walba uga baahan dadaal shakhsi ah (personal effort) ayuu u soo habeeyaa si joogta ahna wuu u hubiyaa inaysan ardayda liidata, kuwa xarfaanta ah ku daba gabban.

Hadal iyo dhammaantii:

Barashow dulqaad iyo
dadaal badan ogsoonow
xilbaad duudka saartee
diiranaan ogsoonow
doqon baa is moogoo
loo duurxulaaye
xumahood ka durugtiyo
digtoonaan ogsoonow.
inaad wada darshoo
dihin aad u godoshoo
daadihiso mooye
yaan daalib kaa caban

## BARE TILMAAMAHA BUUGGA

## SHANAAD.

### BARAHA IYO BARANNIMADA.

Barannimadu ama waxdhigiddu waa xirfad. Waa xirfad qaali ah oo u mudan sida dhakhtarnnimada. Waa xirfad aqoon korodhsi joogto ah iyo maskax furan u baahan, saa Filasoofi, soosiyoolaji (sciology) iyo saykolooji (psycholoji)ayaa xidaddadeedu ka soo jeedaan oo ay salka ku haysaa. Barannimadu barasho ayey u baahan tahay.

Hadda fikradaha kor ku xusan annagoo ka sii amba qaadayna, waxaan ku xusuusinaynaa barannimadu in aanay ku ekayn (inaad garato wixii aad dhigi lahayd oo keliya) ee ay weheliso inaad xirfad u yeelato (sidii aad ardayga ugu gudbin lahayd wixii aad u soo diyaarisay).

Xeesha barannimada wanaagsani waxay ku jirtaa inaad si aan kala go'lahayn oqoontooda u ballaadhisid; inaad shakhsiyad hufan oo ku dayasho mudan yeelatid; inaad kol kasta oo aad cashar gudbinayso aad Jawi waxbarasho aad fasalka ku abuurtid, oo aad ardaydaada dareen wadaag la yeelatid, dhiirri gelin joogta ahna ay kaa helaan oo ay kugu soo hirtaan.

### BARAHA IYO ARDAYGA.

Barannimadu waa xil. Waa xil culus oo dulqaad badan iyo isxilqaan joogto ah la'aantood aan lagu fulin karin, lana haweysan karin. Taasna waxaad si buuxda u garan kartaa marka aad si buuxda aad u dhuuxdid, hoosna ugu dhaadhacdid baraha hawshiisu waxay tahay, iyo cidda uu mas'uul ka yahay.

Dul ahaanba, waxa dunida guudkeeda ku sugan, noole iyo ma nooleba, waxa u qaabsami waa aadamiga. Haddaba waa u sharaf macallinku in uu ahaaday, kii kolka aadamigu ugu jilicsanaa, barbaarintiisa xag anshax iyo xag kasmoba, lagu aaminay.

Waxaase hubanti ah in xilkaas gudashadiisu ayan ahayn mid hawl yar. Waayo ardaygu maaha weel madhan, oo wax kasta oo baruhu soo diyaariyo, marka uu doonayo ku wareejin karo. Waayo in kasta oo ardaygu maangaab garaadkiisu iyo garashadiisu koobantahay, misna waa naffle wax diidi kara, waxna dooni kara. Kol hadday sidaa tahay, waxbarashadiina noqotay mid jujuub ah iyo sankaa kuu duleela ka dheer, oo rabid iyo diyaarid ahaan xagga ardayga ka timaada ku xidhan. Waxa lama huraan ah, in ardaygu qancin, soo dhaweyn iyo xannaanayn kal-bannaan, baraha ka helo.

Waa inuusan baruhu kolna wax niyadda waxbarasho ee ardayga dhimi kara, ama isku kalsoonida ka lumin kara kula kicin, kulana dhaqmin, taana waxa lagu heli karaa:

1) Baraha oo had iyo jeer casharka si tifaftiran u soo diyaariya, sida ugu habboonna ardayda ugu gudbiya.

2) Isaga oo aan ka daalin waxbarashadooda, si tallaabo tallaabo ah u daaddihiya, oo xiisadba inta ay maskaxdoodu qaadi karto ee ay u diyaar yihiin u meeriya.

3) Isaga oo waxa ardayda ku cusub ee aanay garanayn, waxay hore u soo arkeen oo ay garanayaan uga horaysiiya oo isku xidha.

4) Isagoo had iyo goorba wixii ku adkaada ardayda sida ugu sahlan ugu sheega, uguna ceceliya.

Haddiise isaga oo aan waxba u soo diyaarin baruhu ardayda soo hor joogsado, amag-amagleeyo oo cashar ku sheeg u malmaluuqo, ama uu ardaygiisa miskiinka ah la xintamo oo kolkuu garan waayo ama uu gafo uu canaan kulul iyo ciqaabta ku badiyo, ama uu ardayda horteeda ku ceebeeyaba, muran kama joogo in barahaasi ardayga niyaddiisii waxbarasho uu dilay kalsoonodiisiina uu dumiyey; oo halkuu ka barbaarin lahaan waxna uu ka bari lahaa, uu ardaygii qalbi jab iyo baqdin ku abuuray, oo barannimadiisu ay tahay (ina-waxba kama-jiraan).

Waxa isxusuusin mudan in cidda dugsiga ugu qaalisan aysan ahayn macállinka, maamulaha, dhismaha, kutubka ee ay tahay ardayga, muraadka ugu weyn ee waxbarashada laga leeyahayna uu yahay, in ardayga la barbaariyo loona diyaariyo nolosha.

## SIDA LOO HABEEYEY BUUGGA SHANAAD.

Kordhinta aqoonta guud iyo tan dhaqankeenna gaar ahaaneed ka sokow, ujeeddada ugu weyn ee buugga laga leeyahay waxay tahay in si tayo leh kor loogu qaado awoodda wax akhriska iyo wax qoridda ee ardayga. Taas ayaana la tixgeliyey goortii la habeeyey buugga, lana dooranayey casharradiisa oo isugu jira maanso, sheekooyin iyo curisyo.

Teeda kale dhawrka cashar ee buugga ugu soo horreeya, way jilicsan yihiin oo qoto iyo qallafsanaanba yihiin kuwii sannadkii hore ee buugga (afaraad) ay ardaydu ku soo qaadatay. Sidaana waxa loo yeelay laba arrimood dartood.

1) Iyadoo la tixgelinayey dareenka ardayda iyo niyaddooda waxbarasho. Maalmaha u horreeya inuu buuggu u jilicsanndo oo ay kalsooni ku bilaabaan waa lama huraan.

2. In baruhu helo fursad uu ardaydiisa ku derso, ku ogaado bal siday horumar u soo samaynayaan.

Kolkaa baraha waxa la farayaa, casharada hore inta lagu jiro, inuu ardaydiisa u fiirsado oo uu hubsado, saxana meelaha waxbarashadoodu ku liidato; dhiirri geliyana meesha ay ku fiican yihiin ee ay garashadoodu ku sarayso.

XUSUUS:

Waxbarashada waxa sal u ah xeerka ah: (Hubi inta aanad hore u gudbin.)

## H A B K A D H I G I S T A

### DHIGIDDA AKHRISKA.

Wax akhrisku maaha wax dabiici ah oo lagu soo dhasho. Waa xirfad. Waa wax la barto oo laysku tababaro sida xirfadaha kale.

Waxaana hubaal ah in ardayga inta uu yar yahay haddaan wax akhriskiisa la daadihin, oo aan laaxinka laga goyn, inuusan akhrigiisa waxbarashado isu dheel li tirnayn.

Haddaba aynnu u gonda-degnee, guud ahaan, wax akrisku wuxuu u kala baxaa saddex qaybood oo kala ah:

1. Dulmar (Skimming)

2. Akhris baahsan ama guud (Extensive reading).

DULMAR:

Qaybta wax akhriska ugu haraysa, ee ah dulmarku, waa wax akhriska sugan in si dhakhso ardaygu wa xa uu akhriyayo uu isha u mariyo, isla markaana uu la soo baxo mucda ama ujeeddada gundhigga ah ee ereyada daabacan ku dahsoon.

Wax akhriskan dulmarka ah waxa la isticmaalaa mark aad degdegsan tahay ee ay karkabadi kugu jirto.

Haddaba waxa lama huraan ah in ardaygu wax akhriska noocan ah loo tababaro, oo lagu carbiyo in daqiiqaddiiba uu in boqolaal erey ku siman akhriyo, misna uu kolkiiba ulajeeddada la soo baxo· Taana wa-

xa lagu gaadhi karaa iyada oo uu baruhu, raadiyo, kaashadana, ardaydana laylisyo badan oo wax akhriska noocan ah loogu talagelay waqtiyo gaar ah uu u soo bandhigo.

AKHRIS BAAHSAN AMA GUUD.

Qaybtan labaad ee wax akhriska baahsan, ulajeed dada iyo mucda oo keliya in lala soo baxo lama rabo, ee waa in ardaygu 75%uu ka xasuusan karaa waxa uu akhriyayo.

Waa in si joogta ah ardayga loo carbiyaa, oo dhakhsaha uu wax ku akhriyayaa soo kordhaa, oo marka uu dugsiga dhexe dhammeeyo uu xawligiisa wax akhrisku gaadhaa daqiiqaddiiba 200 oo erey, dugsiga sare markuu ebyana gaadhaa daqiiqaddiiba 300 oo erey.

Sida xawligaas degdegga ah iyo fahamka wada socda lagu heli karaa waa iyada oo indhaha ardayga la tababaro oo aanu erey erey wax u akhriyine? Weedho weedho iyo nodo (paragraphs) kolkiiba indhaha ku dhufto, oo misana fahmo.

Haddaba si taas loo suurta geliyo waxa loo baahan yahay, in ardayga looga digo lana necbaysiiyo inuu dibnaha ama madaxa dhaqdhaqaajiyo marka uu wax akhriyayo, waayo wakhti iyo tamar aan loo baahnayn ayaa kaga lumaya. Waa in loo carbiyaa in wax akhriskiisu ku koobnaado indhaha iyo maskaxda oo keliya. Laylisyo gaar ah, oo loogu talagalay eegmo dhakhso ah oo baahsan ama ballaadhan iyo fahmid deg deg ah waa in ardayga loo soo diyaariyaa.

DHUUXID.

Qaybta Saddexaad ee ah wax akhriska lafa gurka ama dhuuxidda, waa mid ah in ardaygu wuxuu akhri-

yayo uu 100% fahmo micnahooda guud iyo kan dahsoonba. Waxa lama huraan ah in ardayga akhriskiisa ay la socdaan dareemid, wax isweydiin iyo fahamba.

Haddaba si taas loo helo waxa ardayga looga baahan yahay:

1. Inuu fahmi karo fikradaha dareenka, iyo caadooyinka ku laqsoon ama ku dahsoon waxa uu akhriyayo.

2) Inuu khayaal ahaan isdhigi karo munaasabad ku hor leh, ha ahaato mid run ah amase yey ahaane.

3) Inuu barto, isweydiiyona sababta uu qof waayaaragnnimo ku cusub, oo uu la soo kulmay uu si gaar ah ugaga hor tago.

Haddaba hadal iyo dhammaantiiba waa inuu baruhu akhriska habboon ardaygiisa ku carbiyaa, maankana ku hayaa in wax akhriska fiican, la helo wax akhris badan dabadii.

## DHIGISTA QORIDDA.

Waxa hubaal ah inay lama huraan tahay, in ardayga lagu abaabiyo wax akhriska habboon, hase yeeshee maaha inuu baruhu akhriska oo keliya fiiro gaar ah siiyyo, ee waa inuu ku garab wadaa oo u diyaariyaa sidii uu ardayga fikradihiisa si habsan isugu xidhiidhin lahaa oo uu qoraal ahaan ku cabbiri lahaa.

Taasi se kuma iman karto habkii hore ama kan maantadan dugsiyadeenna badankooda lagu isticmaalo oo ah in ardayga inta la yidhaahdo wax qor, oo mawduuc mutuxan loo dhiibo, dabadeedna laga saxo.

Wax qoriddu waa xirfad sida akhriska oo kale, waana xirfad la is baro oo weliba dhakhso iyo hawl yari midna lagu heli karin, waa xirfad, dadaal joogta ah xagga baraha iyo ardaygaba uga baahan.

Kolkaa waa inaan ardayga inta fikrad la siiyo aan la odhan wax ka qor, ee waa in marka hore la baaraa sida loo rabo in wax loo qoro.

Waa in kolka hore heer hawl yar looga bilaabaa oo la baraa erey isku xidhka si habsan u muujin kara fikradda laga rabo.

Marka xiga waa in loo gudbaa dhisidda weedhaha iyo nudaha ilaa uu gaadhsiiyo heer uu daadahaynta iyo ku dhakhsashada ka baxo oo uu iskii sugaan hor leh u curin karo.

Tusaale ahaan, haddii qoraalka sheekooyinka la barayo waa in ardayga lagu carbiyaa oo uu u feejignaadaa, sida:

1) Waxyaalaha ku dhacaya sheekada dhexdeeda, la isugu taxo si sheekadu u macaanaato.

2) Ogaadaa in waxa sheekada dhexdeeda ka dhacaya in uu ku fadhiyo ujeeddooyinka jilayaasha sheekada.

3) Sifaynta dadka, xilliga iyo degaanka sheekadu ka dhacayso.

4) Isticmaalka haasaawaha diirran ee nolosha gelinaya sheekada iwm.

Sidoo kale waa in tusaaluhu ugu badnaadaa heerarka kala geddisan, si fududna ardayga laagu tilmaamaa gundhigga hadalka qoran iyo adeegsigiisa kala duwan. Waa in la baraa weedhaha iyo nudaha sababta iyo sida loo kala horraysiiyo ee habka, habka kale looga dooro.

Taasi ayaa keeni karta xirfadda qoraalka ee uu ardaygeennu u jeellan yahay. Taas ayaa kalsooni ku abuuri karta, ilaa uu marka dambe gaadho heer uu iskii wax u allifo, isagoo is-naqdiyayana uu ogaado erey walba oo uu qoro sida uu u doortay, habkaasna uu wax ugu qoray.

## DHIGISTA MAANSADA.

Maanso waa hadal aan tiraab ahayn oo ku dhisan tix, kuna habaysan xaraf, luuq iyo jaan, oo u kala baxa Gabay, Hees, Jiifto, Guurow iyo Saar IWM.

Haddaba murti iyo fikrad badan oo ay adkaan lahayd iyagoo hadal caadi ah ama tiraab ah, sida ardayga loogu gudbiyaa, ayaa maansada lagu gudbin karaa waayo iyadu waa wax luuq iyo jaan ku habaysan, oo ardayga xiise ku abuuri kara, dhegtiisuna jeclaysan karto.

Kolkaa, baruhu, markuu maansada dhigayo, waxa lama huraan ah inuu tixgelin gaar ahaaneed siiyo qodobbadan hoos ku qoran:

1) Waa inuu hubiyaa, marka horeba, inay maansada uu dhigayo heerka ardayga iyo waayoaragnnimadiisa la da' tahay, kuna habboon tahay.

2) Nooc kasta oo maanso ah kolka la dhigayo, waa in ardayga la faraa inuu mar in ka badan akhriyo si uu u dhuuxo fikradda maansadu xambaarsan tahay.

3) Maansada marka ardayga loo akhriyayo waa in kor loogu dhawaaqaa, oo loogu luuqeeyaa hadday suuragasho.

4) Ardayga waa in lagu dhiirri geliyaa inuu garto, qabtana erayada ku cusub ee hadba nooca maansada uu dhigayana ku jira.

5) Ardayda waa in la baraa laguna dhiirri geliyaa inay hadba maansada nooca ay baranayaan luuqdeeda gaarka ah si qumman oo aan laaxin lahayn ugu dhawaaqaan.

6) Waa inay ardaydu maansada mar mar ku luuqeeyaan.

7. Si loo sugo kasmada ardayda khaladaadkoodana loo saxo waqtiga ku habboon, cashar kasta oo maanso ahi, waa inuu laylisyo kale duwan ku gabagaboobaan.

8. Ardayda waa in had iyo jeer loo sheegaa, maansadu noocay doonto ha ahaatee, hal abuurka curiyey iyo munaasabadda uu ka hadlayo.

9. Dulucda maansada la dhiganayo, iyo ujeeddada guud waxay tahay, si kooban waa in ardayda loogu sheegaa, loona garansiiyaa sida ugu habboon.

10. Tabaha iyo sida dulucda lagu gaadhay, waa in ardayda loo tafatiraa loona faahfaahiyaa.

11. Waxa habboon maansada marka la akhriyayo, bilowga iyo dhammaadka inay ardaydu dhegta ka maalaan, xagga maskaxdana ka feejignaadaan oo aanay wax kale ka soo dhex gelin.

12) Sida badan, nooc kasta oo maanso ah oo la dhigayo, ereyada cusub ee qallafsan ee ku jiri kara ka sokow hadallo maldahani kama madhna. Kolkaa hadalladaasi ujeedooyinkooda dahsoon waa in ardayda loo saafaa.

13) Waa in loo cayinaa maansooyin gaar ah ardaydu dusha ka xafidaa.

## DHIGISTA CURISKA.

Sidaan hore u sheegnay, awoodda wax akhris iyo tan wax qoris ee ardaygu waxay la kobcaan, lana socdaan kolba heerka uu waxbarashada ka marayo.

Heerkanna (kan shanaad) ardayga waxa laga rabaa inuu qori karo curis ka koobann dhawr nudood oo uu abbaar sugan kaga hadlayo.

Haddaba si taasi ardayga loogu carbiyo, waa inuu baruhu fasalka ka dhaqan geliyaa ammuuraha hoos ku qoran:

1) Marka ugu horraysa, mawduuca ardaydu ay wax ka qorayaan, waa inuu ahaadaa mid waaya aragnimadiisa iyo aqoontiisa la da' ah. Haddaba waxa habboon, in baruhu uu ardayga siiyo, mawduucyo kala duwan si arday kastaaba kuu wax ka yaqaan, wax uga qoro oo uu u doorto.

2) Ardayga waa in la baraa curis qodob-qorshayna, la sii garansiiyaa in qodobbada qorshayntiisa si ku talax tegid ah uu u sii faahfaahiyo aanu u baahnayn.

4) Ardayga waa in lagu dhiirri geliyaa lana garansiiyaa in uu curiska si toos ah ugaga hadlo mawduuca uu wax ka qorayo ee aanu arar iya laalaabasho kale waqtiga iskaga lumin.

## DHIGISTA SHEEKADA.

Baruhu marka uu dhigayo sheekooyinka, waa in uu maanka ku hayaa qodobbada hoos ku xusan:

1) Mar kasta oo uu baruhu sheeko cusub dhigisteeda billaabayo, waa inuu ka bixiyaa hordhac kooban oo xiise ardayga ku abuuri kara, casharkana u soo jeedin kara.

2) Waa inuu baruhu marka hore ardayda sheekada u akhriyaa isagoo ku dadaalaya inuu dareenka ka dhadhansadaan, dabadeedna waa inay iyagu hoos u akhriyaan.

3) Labadaa akhris ka dib, waa inuu baruhu ardayda u sharaxaa erayda qallafsan iyo hadallada maldahan ee sheekada ku jira.

4) Waa inuu baruhu la falanqeeyaa ardayda, dulucda sheekada, dhammaadka iyo jilayaasha sheekada xidhiidhka ka dhexeeya.

## CASHAR QORSHAYNTA.

Baruhu isagoo had iyo jeer ku xisaabtami doona Tusaalooyinkii arartii guud ku xusnaa ee khuseeyey dareenka iyo niyadda waxbarasho ee ardayda, wixii beddelid u baahanna goob joog u ah, waxaan kula alinayaa in qorshaha cashar gudbintiisu ahaado, sidatan oo ay xiisaddu ugu qaybsanto.

1. Nakhtiin iyo hordhac
2. Akhris (1,2)
3. Sharaxaad iyo laylisyo.
4. Sixid.

Haddaba, si uu noola garto qaybaha kor ku taxan ujeeddooyinka laga leeyahay iyo fulintooda faa'iidooyinka ay keeni karto, qayb kasta gaar ahaanteed ayaynnu u soo qaadanaynaa.

## NAKHTIIN & HORDHAC.

Si baraha wax dhigistiisu u ahaato silsilad isku xidhiidhsan, waa inuu xiisad walba daqiiqadaha ugu horeeya ku qaato nakhtiin, oo ardayda casharkii uu shalay u meeriyey, uu u guud maraa, wax ka weydiiyaa, wixii ku celin u baahanna ugu celiyaa.

Goortay taasi fusho, waa inuu casharka cusub u gudbaa, oo isaga oo u gogol xaadhaya deriska, uu hordhac kooban iyo aragti guud ardayda ka siiyaa, sida: Hadduu maanso yahay; cidda tirisay, munaasabadda iyo wuxuu ku saabsan yahay, IWM

## AKHRIS (1aad, 2aad).

Sidaynnu horeyba u soo sheegnay, ujeeddooyinka buuggan shanaad waxa udub dhexaad u ah in awoodda wax akriska ee ardayda kor loogu qaado. Kolkaa, baruhu isaga oo taasi maanka ku haya waa in cashar kasta akhriskiisa laba qaybood uu ahaadaa.

1) Iyadoo buugagga ardaydu isku laaban tahay waa inuu baruhu casharka kor u akhriyaa, isaga oo meeshii hakad ku jiro ku hakanaya.

meeshii joogsi buuxa ahna uu ku joogsanayo Waa inuu ku dadaalaa inuu weedhaha iyo nudaha uu akhriyayo micnaha iyo dareenka dahsoon, muuqaalkiisa iyo codkiisa ay aradaydu ka dhadhansato.

2) Intaa ka dib waa inay ardaydu buugagga furtaan hoosna ay u akhriyaa.

Baruhu waa inuu xusuusnaadaa in akhriska qaybta ugu muhiimsani ay tan tahay. Kolkaa, waa inuu ardayda waqti ku filan siiyaa, isaga oo ammin-tilmaame u qaadanaya arday uu yaqaan in xawliga wax akhriskiisu hooseeyo. Baruhu waa inuu misana fasalka dejiyaa, oo xitaa hadalkuna ka reebnaadaa xaggiisa iyo xagga ardaydaba. Waayo muraadka wax akhriska laga leeyahay, waa inay ardaydu maskaxda ka shaqaysiiyaan, fahmaanna fikradaha iyo macnaha ku dheehan bogga daabacan.

Teeda kale hoos u akhriga (aamus akhriga) faa' iidooyin badan ayuu ardayda u leeyahay, waxaana ka mid ah:-

b) Iyadoo arday kastaaba wax ku akhriyo xawligiisa wax ahkhris.

t) Iyadoo arday kastaaba helo fursad iyo waqti uu ku fakiro. Marka uu u baahdo ardaygu dib ayuu ugu laaban karaa mar labaadna wuu akhriyi karaa.

j) Waxay ka hor tagtaa in ardayda qaarkeed dhegeystayaal aan waxba akhriyin oo kuraasta fadhiya uun noqdaan.

x) Ardayda waxaad ku carbisaa, kuna abuurtaa inay iskood wax u akhristaan oo ay dhaqan wax akhris la kobcaan.

Ugu dambayntii intay ardaydu hoos wax u akhriyayaan, waa inuu baruhu ku dhex wareegaa fasalka, hubiyaana in ardaydiisu la hana qaadayaan dabeecadihii wax akhriska habboon. Sida arday kastaaba, in fogaanshihii loo baahnaa buugga iska fogeeyey (10 inch), inuusan ardaygu kolba madaxa gees u dhaqaajinayn ama uusan sadarrada farta la raacayn. Dibna dhaqaajinta iyo hoos u guuxidda, waa in ardayda laga waabiyaa lana necbaysiiyaa.

Habka wax akhris ee habbooni waa kan ku kooban, isha iyo maskaxda, waana kaas kaynnu rabnaa inaynnu ardaydeenna ku barbaarino.

Baruhu waa inuu xusuusnaadaa in wax akhrisku uu yahay xirfad ee aan lagu dhalan, ardayguna u baahan yahay in lagu carbiyo.

## SHARAXA IYO LAYLIS.

Sidaan hore u sheegnay baruhu arday xawligiisu wax akhris gaabiyo isagoo u qaadanaya waqti-dhawre, kolkuu hubiyo in fasalku akhrigii casharka uu bogay, waa inuu sharaxaadiisa casharka u bilaabaa. Waa inuu arday kasta ku dhiirriyaa, waxa ku adag iyo meeshii madmadow kaga jiro inuu warsado, oo uusan baruhu kolna ka wahsan inuu ugu celceliyo.

Sharaxaaddu waa inay ahaataa mid abbaarteedu sugan tahay oo aan heehaabayn. Waa inay ahaataa mid xiiso leh oo si joogto ah dareenka ardayga u soo jiidanaysa. Tusaala ahaan kolkaa baruhu erayada

cusub iyo hadallada maldahan, waa inuu ardayda dib u xusuusiyaa casharka meelaha ay kaga jiraan, ku dhiirriyaa nudahay raacsan yihiin, inay mar labaad akhriyaan macnahoodana halkaana kala soo baxaan.

Haddayse hore u garan waayaan oo ay ku adkaato, waa inaan waqti badan la iskaga lumin.

Waa inuu baruhu ardayda macnaha u sheegaa, isagoo hadal caadi ah iyo weedho jilicsan isticmaalaya.

XUSUUS:

Kol kasta oo uu baruhu wax dhigayo, ama sharaxayo waa inuu codkiisu ahaadaa, mid dhexdhexaad ah oo si fiican fasalka gudihiisa looga maqlayo.

LAYLISYO.

Murtida ugu weyn ee laylisyada laga leeyahay, waa inuu ardaygu maskaxda ka shaqaysiiyo. Marka baruhu waa inuu hubiyaa inaysan ardaydu isku dhex dhuuman, oo fasalka intiisa badani dhawrka xarfaanta ah ku daba gabban.

Haddaba intaas si loo helo, waa inay laylisyadu ku dhisnaadaan qorshaha ah:

1. In arday waliba uu helo fursad uu ku fakiro, kuna jawaabo af ahaan iyo qoraal ahaanba.

2. In weydiintu meerto ahaato, oo uusan ardaygu garan goor su'aashu kusoo aadi doonto.

Taasi waxay dhalinaysaa inuu su'aal walba ka jawaabideeda u sii diyaariyo (oral).

Taa macnaheeduna waa inay laylisyadu u kala baxaan qayb afka lagaga jawaabayo, iyo qayb qoraal ah.

Ka shaqaynta laylisyada ardayda ayaa iska leh, inta aysan bilaabinse, su'aalaha la weydiinayo qaar oo nooc ah oo tusaale u noqda waa in baruhu sabuuradda kaga shaqeeyaa.

XUSUUS:

Baruhu waa inuu maanka ku hayaa inay lama huraan tahay, in si joogta ah ay ardaydu horumar xagga wax qoridda iyo akhriska ah u sameeyaan.

## SIXIDDA.

Sixiddu waa hawsha baraha. Khaladaadka ay sameeyaan inay ogaadaan, dib u saxdaanna waa hawsha ardayda.

Taas micnaheedu waxa weeyaan inuusan baruhu marnaba ka wahsan inuu saxo hawsha uu ardaygu soo qabto, ama aan hawl ardaygu si khalad ah uga soo shaqeeyey looga tegin iyadoo la toosin. Waa in baruhu ardayda si joogta ah ugu taakuleeyaa, sidii uu khaldaadkiisa ku ogaan lahaa, una hagaajin lahaa intay goori goor tahay.

## TUSAALE-I-(gabay).

## GOBANNIMAAN SHEEGTAY (Wiilwaal)

Ujeeddada Casharka:

In geesinnimada, deeqsinnimada iyo aftahannimadu yihiin walxo qaali ah oo lagu faano.

I. Hordhac:

Ugaas Wiilwaal wuxuu ahaa Suldaan geesinnimo, aftahannimo, iyo inta nin rag ah lagu ammaanaba ku tilmaaman. Ugaasku wuxuu nolol ku soo gaadhay qarnigii Toddoba iyo tobanaad, wuxuuna ku dhashay jiida magaalada Jigjiga ku taallo.

Wuxuuna kale oo ugaasku ku caan ahaa jaribaad badni. Wuxuu jeclaan jiray inuu wax walba ka gungaadho. Wuxuu ahaa ninkii curiyey halxidhaalaha ah: «Cadka rag isku raaco waa kee? waa hunguriga ah, waxa kale oo ugaaska laga hayaa: oo uu yiri «inan rag hooyadiina u tu'iyey oo wuxuu walaal ku dhaamo waayey».

Ugaas Wiilwaal intuu saldanadda haystay, dagaallo badan oo uu badankooda ku gacan sarreeyey ayuu xabashida ku qaaday. Gabaygana oo ujeeddadiisu tahay baan, tookh ama faanna dagaaladiisaa libineed ayuu ka tiriyey isagoo ku halqabsanaaya geesigii lagu liibaanay ee Garaad Axmed Gurey:

II. Gabayga baruhu kor ha u akhriyo (ha ku luuqeeyo hadday suura gal tahay).

III. Gabayga ardaydu hoos ha u akhrisato.
Xusuus:

In mar ka abadan ardaydu gabayga ha akhrido.

IV. Sharaxa (meeris meeris ku siman): Ugaasku isaga oo faanaya wuxuu leeyahay:

1) Kufrigii xabashiga ahaa ee dagaallada isugu soo habar wacday ee illaa iyo webiga daankiisaa isaga soo gurmaday.

2) Ee ahaa kuwii uu Garaad Axmed Gurey qayb ahaan gumaaday waagiisii, ee uu meydkooda wadhay agagaarka magaalada goondar.

3. Hadday ii soo baxeen intay col soo dumeen, waa Ilaahay mahaddii saa in badankooda mawdku ka adeegayo oo aanay igu aadin iskana kay dhi cin karin ayaan garane.

4. Wax la ii soo qalab qaataba, maalintaan hashayda golyo ah darka ku soo horay, inay libin ku cabtay iyadoon ul lagu taagin, ayaan sheegtay.

5. Xabashida abbaanduulahoodii Gurey ahaa maa lintaan qudha ka gooyey. In dabarkood go'ay oo aan ka goloonaaday ayaan sheegtay.

6. Gabigaan xusulka ku mutay, in rag kale ku soo hagaagi waayey oo baqe awgii laga leexday ayaan sheegtay.

7. Wiilwaal ka tegey oo af maal ah iyo sagaal kale oo aan waran ku tumaatiyey oo aan meydkooda ka tallaabsaday ayaan sheegtay.

8. Nin kasta ha hadlee deeqsinimo, aftahannimo, lala joogsado gole waayeel fadhiyo, iyo Gobannimo iyo geed sare ahaan ayaan sheegtay.

V. Su'aalo waxay ardaydu soo jeediso oo uu baruhu ugu jawaabo, iyo meeshii ku celin u baahan oo uu ku celiyo.

VI. LAYLIS (B).

Weydiimaha hoos ku qoran, ardaydu hadal ahaan ayey si kooban ugaga jawaabayaan.

1. Hadday gaaladu si ay isaga ula dagaalamaan isuğu soo gurmatay, muxuu Ugaasku ugu farxay, oo uu Ilaahay ugu mahadiyey.

2. Maxaa suurta gel ka dhigay in geeliisu uu nabda ku cabbo.

3. Laba gurey ayaa gabayga lagu magacaabay, maxay kala ahaayeen?

4. Maalinma ayuu colkii xabashida dabarkoodu go'ay, oo la jebiyey, siduu gabayaagu sheegtay?

5. Ugaasku muxuu Axmed Gurey ugu halqabsaday? Waxyaalo badan ayey labadoodu iskaga mid ahaayeen, maxaa ka mid ah?

LAYLIS (T).

Qoraal fasalka gudihiisa ah, ama shaqo guri ahaan ayey ardaydu qaybtan ugaga jawaab celinayaan.

1. Gaalada isu soo guurtay ee gabayaagu sheegayaa, waa kuwee? xaggeese ay isaga soo guureen bay kula tahay?

2. Garaad Axmed Gurey, yuu ahaa? muxuu ilaa iyo maanta ku caan yahay?

3. Garbidaan ku tiirsaday, inuu rag kale garab maraan sheegtay?

   sheeg ujeeddada dulucdan?

4. Sheeg duluca gabayga ku jira ee gabaygaagu ku faanayo inuu yahay nin deeqsinnimo iyo aftahamo leh?

5. Ugaasku inuu nin muslin ah ahaa, sheeg duluc-da kuu caddaynaysa?

XUSUUS:

Gabaygan iyo kuwa kale ee uu baruhu doorbidaba, waa inay ardaydu dusha ka xafidaan.

TUSAALE- II (SHEEKO).

M A T A B C A D E.

UJEEDADA:

In ardayga laga dhaadhiciyo loona qeexo in tabcashadu ama shaqadu ay tahay tiirka nolosha oo qofkii aan shaqaynin uu yahay qiimo laawe noloshii ku saaqiday.

I. HORDHAC:

Waayihii hore intaan qoraalka afku soo bixin, dadka waaweyni waayo aragooda sheeko xariiro ayey ubadkooda ugu gudbin jireen. Sheekadan matabcadena waa mid noocaas ah oo salka ku haysa murtida ah inaan aadamigu qiimo iyo qaayo toona lahayn haddii aanu shaqaysan.

Sawirka guud ee sheekadu waa nin ma shaqayste ah, oo xilkii waalid gabay, oo misana raba isagoon far dhaqaajin oo aan hawl ku dhididin inuu xoolo helo. Waa hore ayaase la yidhi: Xaglo laaban xoolo kuma yimaadaan. Amase (Fadhi iyo fuud yicibeed laysku waa.)

Waxba ma helayo, cidla ayaa waraabe ku cunayaa. Haddaynnu mucda sheekada hoos ugu dhaadhacno,

waxa muuqata in (matabcade) mo'oyee jilayaasha sheekada midba wax u taagan yahay, waana sidatan:

b. Waayeelka sama sheegga ahi wuxuu taagan yahay «Runta Nolosha.»

T. Geedka mooska ah iyo qasnadda ku aasani, wuxuu u taagan yahay beer falashada iyo kheyraadka dhulka ku jira ee hadduu shaqaysto aadamigu kala soo bixi karo.

J. Kalluunka iyo dheemanta cunaha fadhida, waxay u taagan yihiin kalluumaysiga iyo khayraa dka Badda ku kaydsan ee hawl dabadeed aadamigu hanan karo.

X. Waraabuhuna wuxuu u taagan yahay ma tabcasho la'aanta iyo caajisnnimada.

Isku soo wada duub, oo murtida sheekadu waa in shaqadu tahay aasaaska nolosha, qofku wuxuu niyadda ka jecel yahayna waxa keliya ee uu ku gaadhi karaa yahay hawl ku dhaqaaqid, dadaal iyo adkaysi.

II. Sheekada baraha ayaa kor u akhriyaya isaga oo meeshii hakad ku jiro, ku yara hakanaya, meeshii joogsi ahna si buuxda ugu joogsanaya, codkiisana iyo muuqaalkiisana ku dadaalay in micnaha dahsoon ee qoraalka, ardaydu ka dhadhansato.

III. Sheekada ardayda ayaa hoos u akhriyaysa, iyagoo hadal, guux iyo dibno dhaqaajin intuba ay ka reeban yihiin.

## VI. EREYADA CUSUB IYO WEEDHAHA:

Abidkeed: Weligeed

Arrad kamay bixin; dhar ku filan may helin. Silic iyo Saxariir: ba' iyo baaba' Dayac iyodacdarro: Darxumo iyo daryeel la'aan.

Ku sugan yahay: ku nool yahay. Boggii iyo beerkii baa isku dhegey: Gaajo darteed bay qoryo noqdeen.

Habeenka iyo Maalintu xidhiidhsanaadaan:

Habeenka iyo Maalintu iska daba tegaan.

Buraashadiisii : Weysadiisii

Wax jaan : Wax baas

Xaggeed u xusul duuban tahay : xaggeed ku deg degaysaa

Ma magaalo : Ma cagaaro

Maandhow : Gacaliyow

Hawraarsan : Waa hagaag

Dhabbadii : Jidkii

Dalqada : Cunaha gudihiisa

Wuxuu soo dhudhun hore, dhudhun dambe yaaba : Wuxuu soo tallaabsadaba

V) Waxay ardaydu su'aalo soo jeediyaan oo uu baruhu uga jawaabo, iyo meesha ku celin u baahan oo uu ku celiyo.

VI) LAYLIS (B).

Weydiimahan ardaydu si kooban ayey hadal ahaan ugaga jawaabayaa.

1) Maxaa ninka sheekadu ku socoto matabcade loogu bixiyey?

2) Markuu ka bixitimay gurigiisa ninku muxuu qalab sii qaatay?

3) Sheeg seddexii dhibaato ee ay waraabaha, geedka iyo kalluunku u sheegteen ma tabcade?

4. Matabcade, waayeelkii same sheegga ahaa, markuu dib uga soo laabtay, jidka intuu ku soo jirey muxuu soo samaynayey?

5. Waayeelku, saddexdii dhibaatooyinka sheegtay mid walba, daawdiisu waa maxay ayuu yidhi?

LAYLIS (T).

Qaybtan si qoraal ah ardaydu ha ugaga jawaabto.

1) Maxay ahayd ujeeddada ka dambaysey talada waayeelku ma tabcade siiyey?

2) Waa maxay fikradda ka dambaysa dheemanka kalluunka cunaha u fadhiya iyo qansadda geedka hoostiisa ku aasan?

3) Waa maxay dulucda (jeeddada) sheekadu? Maxay inna baraysaa?

4) Adigoo la kaashanaya murtida sheekada, si kooban u sharax labadan maamaahood :

b) Xaglo laaban xoolo kuma yimaadaan.

t) Fadhi iyo fuud yicibeed laysku waa . .

5) Dhammaystir heestan gaaban:
Anigoon u hawshoon ——————
Hanti badan inaan heli ——————

TUSAALE - III -

QORAALKA FAR SOOMAALIGA.

(CURIS)

Ujeeddada Casharka:

In ardayda la dareensiiyo in qoraalkii farta uu ahaa, welina yahay guul weyn oo ummadda Soomaaliyeed u soo hoyatay oo ay afkeenna iyo qoraalkiisaba yihiin laba wax oo aad u qaali ah oo ku faanid mudan.

I. HORDHAC:

Ummad aan far qoran lahayn hiddaheedu waa lumaa, oo dhaqan guur bay halis u noqotaa. Aqoontoodu ma kobocdo, ogaalka iyo fikriga mujtamaceeduna ma hanaqaado.

Taariikhdu ma sugnaato diiwaan gelin u hagar baxdana ma ay hesho. Qarannimadeedu waa mid inta badan maamul shisheeye marti u ah, madax bannaanideeduna waa tu maqaar saar ah. Horumar ijtimaaci, siyaasi iyo dhaqaaleba siday ugu tallaabsataa waa si adag.

Kolka waxa run ah in ummadda Soomaaliyeed dhibaatooyinka kor ku carabaaban ay haysteen intii aan farteeda la qorin, si heer qaran ahna aan loo hirgelin. Waxa kale oo iyana xusid mudan in farteenna qoraalkeedu iyo taariikhdeedu aysan ka bilaaban 1972kii ay ku timi hawl badan iyo cilmi baadhis badan dabadeed. Aqoonyahanno Soomaaliyeed oo soddoneeyo sano in ku siman far baadhis ku hawlanaa ayaa jirey. Halyeyadaas waxa ka mid ahaa Cismaan Keenadiid oo curiyey fartii la odhan jirey (Cusmaaniya) iyo Shire Jaamac oo isagu lahaa mahadi ha ka gaadhee curintii xuruufta intooda badan far soomaaliga maantta hanaqaaday.

Waxa kale oo jirtey in dad badan oo shisheeye iyo soomaalilia leh, ay jireen oo qoristii farteenna si badheedh ah iyo qarsoodiba isu hortaagty. Isla maantadan aynnu joogno oo farteennu taabba gashayna waxa jira dad badan oo maskax gumeysi leh,, oo meelahaa kaga af-dhuubleeya inaan far soomaaligu aanu waxba ahayn; in aqoontii iyo waxbarashadeennii hoos u dhacda, taas ayaan sabab u tahay qoriddii iyo cilmiyeyntii af soomaaliga.

Halla kama jiraan iyo
taasi waa huf iyo been
waa hadalkii caalwaa
habqankii shisheeye ee
waa hudahudayntii
halis weerarkiisii
hunbaaliyaysigiisii
hadba hirar ka baaqii
hor gadaal u celintii
markuu haadku noo baxo
hoos noogu rogiddii
inan hidino socodoo

aan horumar gaadhnaba
waa naga horjoogii

II Curiska oo uu baruhu ardayda kor ugu akhriyayo.

III Ardayda oo curiska hoos u akhrisata.

IV Erayada cusub iyo odhaahaha.
Riyaaqeen : Ku farxeen
Nidaam : Hab
Ajnabi : Shisheeye

V Waxay ardaydu su'aalo soo jeediyaan oo uu baruhu uga jawaabo, iyo meesha ku celin u baahan oo uu ugu celiyo.

VI. LAYLIs (B).

Weydiimaha soo socda ardaydu afka ama hadal ahaan ayey si kooban ugaga jawaabayaan.

1. Goormaa dadku u baahday in far la yeesho?

2. Goormaa af Soomaaliga fartiisa la qoray?

3. Intii aan afafka la qorin dhibaatooyin badan ayaa innaga haysatey xagga far la'aanta ee maxaa ka mid ahaa?

4. Dad baa ku dooda in qofkii Ingiriisiga ama talyaaniya yaqaan, uu ka aqoon badan yahay ka Soomaaliga yaqaan in kasta oo heerka waxbarashada ka siman yihiin. Fikradda maxaad ka qabtaa?

5. Sheeg inta cod ee af Soomaaligu ka koobanyaha?

LAYLIS (T):

(Weydiimaha hoos ku taxan ardaydu qoraal ahaan ayay ugaga jawaabayaan.

I. Erayada hoos ku qoran kuwa la micna ah keen, shan ka mid ahna weedho soo geli:
Daar, Sar, Weji,
Sira, Curiyaan,
Dhawaaq, Hirgeshay,
Barakaysan.

II. Si kooban u sharax maahmaahan:
b. «Aqoon la'aani waa iftiin la'aan.»
T. «Far keliyi Fool ma dhaqdo.»
J. «Ilko wadajir bay wax ku gooyaan.»

III. CURIS:

Waxaad ka sheekaysaa maalintii ay kuugu darnayd ee ku soo martay intaad dunida ku noolayd.

ujeeddooyinka laga leeyahay buugga fasalka Lixaad waa:

1) Inuu siiyo ardayda casharro xiiso leh, korna u qaado aqoontooda guud iyo middooda af Soomaaliga, dhadhansiiyo macaanka suugaanta Soomaaliyeed qaybaheeda kala duwan iyo u riyaaqidda, sheeko abuurinta, male curinta tebinta afkaarta (warqad qoraal).

2) Kor u qaadidda akhriska iyo qoraalka ardayga.

3) Kala hor marinta casharrrada sida ay u kala fudud yihiin, ujeeddada loo yeelayana waa kalsooni abuurid.

4) Kalsooni hadal iyo qorid.

5) Dhaqso iyo faham buuxa oo wada socda.

Haddaba si arrimahaasi kor lagu soo sheegay oo dhan loo, hanto habka toosan ee ugu fudud ee loo hirgelin lahaa dhinaca dhigista, si ardaygu si habsami ah loogu gudbiyo, waxa tilmaamo la raaco lagu suntay buuggan tilmaame bare oo loogu tala galay baraha in uu ka kaalmeeyo habka wax-dhigista, mawduucyada kala duwan ee buugga fasalka akhris iyo qoraalba.

Buuggu guud ahaan wuxuu ka kooban yahay una kala baxaa:

1. ARAR GUUD

2. HABKA DHIGISTA

— Dhigista akhrista
— Dhigista sheekada
— Dhigista maansada
— Curiska
— Warqad qoraalka

## AKHRISKA

1) Akhrisku heerkan wuxuu noqonayaa, iyadoo la sii xoojiyo, lana sii ballaadhiyo tabihii hore loo isticmaali jirey — Akhriska aamusan, akhriska ku dhawaaqa ah iyo dhegeysi.

2) Casharrada la akhriyayaa waa kuwo ka dhaadheer kuwii buuggii hore, ha ahaato ereyada cusub, dulucda, fikradda iyo aqoonta ay fidinyaaba.

3) Heerka waa inuu akhrika ardaygu yahay mid sugan xagga ku dhawaaqa, dhakhsaha iyo dhuuxidda macnaha.

4) Waa inuu ardaygu ka soo saari karaa sheekada uu akhriyey fikradaha muhiimka ah ee ku dhisan tahay sheekadu.

5) Inuu noqdaa mid kasmada ardayga kor uqaadaya, dhisaya ama kordhinaya awooddiisa afka, barashada ereyo cusub isticmaalkooda kala doorashada iwm.

6) Inuu noqdo mid si weyn uga kaalmeeya ogaanshihiisa degaanka, lana xidhiidha duruusta kale ee dugsiga lagu barto.

7) Inuu akhriskani noqdo mid ardayga ku abuura wax akhris jacaylka.

8) Waa in ardaydu u qabaan xiisaynta waxyaabaha kale ee dhaafsiisan buuggooda, u akhriska aqoon raadinta. z

## SIYAABAHA LOO DHIGAYO AKHRISKA GUUD AHAAN

Waxaynu nidhi ujeeddada koowaad ee akhriska laga leeyahay waxay tahay in ardaydu fahmaan waxa la akhriyayo. Akhriska hadda wuxuu noqonayaa in marka ardaydu casharka akhrido mid aamusan, dhawaaq ama dhegeysi kuu doonaba ha ahaadee, waa in uu baruhu su'aalo ka weydiiyaa ku saabasan waxa la akhriyey. Waa inuu sharraxaa waxay sheekada casharku ka hadlayso ama ku saabsan tahay, sarbeebaha casharka ku jira, macnaha ereyada cusub, af maldaheedka. Si gaaban haddii loo yidhaahda waa:

1) Sharaha guud,
2) Sharaxa ereyada cusub,
3) Sharaxa weedhaha adag,
4) Sharaxa afka maldahan,
5) Sharaxa sarbeebaha,
6) Iyo badanaaba wuxuu inna taabsiinayo casharku (Moral).

Marka uu macallinku sharaxiisa dhammeeyo dib ha ugu laabto casharka oo ha ka warsado ardayda su' aalaha dhinaca kasmada.

Markaa ka dibna ha siiyo laylisyo fasalka gudihiisa ah, mid afka ah (oral) iyo mid qoraal ahba (haddii waqtigu kugu simo) iyo shaqo guri oo xiisadda kale lagu saxo.

## HABKA TOOSAN EE AKHRISKA.

Akhriska aamusan inta lagu jiro baruhu ha hubiyo in ardaydu akhris hagaagsan oo sugan ku dhaqmayaan. Waa inuu baruhu fiiro gaar ah siiyo kana ilaaliyaa ardayda:

1) Dibno dhaqaajinta

2) Madax dhaqdhaqaajinta

3) Hugun iyo gunuunacba, iwm.

## NOOCYADA AKHRISKA IYO SIYAABAHA LOO DHIGAYO.

B. Akhriska aamusan:

Xiisadda la akhriyayo buugga fasalka baruhu ha dooro mawduuca la akhriyayo, ka dibna ha raaco tallaabooyinka soo socda:-

1) Jawi munaasib ah, waa in baruhu diyaariyaa, si uu xiiso gelinta ardayda u kiciyo, taasi waxay ku imanaysaa weydiino guud oo la xidhiidha mawduuca casharka.

2 Ardayda oo casharka akhrida akhris mid aamusan, iyadoo loo tilmaamayo inay adeegsadaan aragooda iyo maskaxdooda; marnaba aanay dhaqaajin dibnaha si ay u bartaan akhriska habboon ee saxa ah. Akhriskani ha noqdo mid waqti munaasib ah oo uu xadidi inta aanay bilaabin.

3) Baruhu ardayda ha u jeediyo su'aalo uu soo diyaarsaday; mararka qaarkood sabuuradda ayuu ku qorayaa inta aan akhriska la bilaabinba, ama wuu soo daabacayaa una qaybniayaa ardayda iskuna dayaan si ay uga jawaabaan.

4) Su'aaluhu ha u kala horeeyaan sida ay u kala mudan yihiin, kana dheeraanayaan su'aalaha macnaha dahsoon leh ee maldahan.

5) Baruhu ardayda ha la falanqeeyo wixii ka dahsoon ee ah macnaha ereyada, odhaahaha, weedhaha, af maldaheedka iwm.

6) Baruhu ardayda ha siiyo waqti si ay fursad ugu helaan su'aalaha ay hayaan ee u baahan in la bayaansho. Waa in baruhu la falanqeeyaa si ardaydu macnihii ugala soo dhex baxaan.

7) Haddii waqtigu u saamaxo, ha la akhriyo casharka, akhriska ku dhawaaqa ah.

8) Baruhu wuxuu ardayda fari karaa inay casharka soo gaabiyaan iyagoo adeegsanaya habkooda fikradeed iyo ereyadooda.

9) Haddii casharku yahay mid ku haboon jilid, baruhu wuu fari karaa ardayda inay sidaa yeelaan.

T. AKHRISKA MADAXA BANNAAN:

Arday waliba waxa uu dooranayaa wax uu akhriyo, ha ahaato buug ma sheeko akhris aamusan si uu u fahmo, uguna raaxaysto waxa uu akhriyayo. Muhimadda baruhu waxay noqonaysaa nidaaminta shaqada, tusaa-

laynta iyo tilmaamidda wixii u baahan in laga kaalmeeyo, ardayda mid mid ama koox ahaanba.

Akhriskani wuxuu noqon karaa fasalka gudihiisa ama maktabadda dugsiga; taas oo laga filayo in laga helo buugaag, sheekooyin, jariirado iwm.

Baruhu wuxuu gaar uga dhigayaa xaasadaha qaarkood. Waxa fiican in baruhu ardaydiisa faro in ay sheeko uu mid waliba akhriyey inuu qoraal ahaan soo gaabiyo, dabadeedna fasalka u akhriyo xiisadda akhriska qayb ka mid ah.

Baruhu waxa waajib ku ah inuu ardayda jeclaysiiyo akhriska, kuna hanuuniyo kulanataliyo akhriska madaxa bannaan.

Si taasi u suuragesho waa inuu baruhu u sahamiyo ardaydiisa sheekooyin iyo buugaag ama jaraa'id aad u xiiso leh, qaybo (ama intiisa xasuusagel ah) dhammaan u akhriyo, had iyo jeerna u tilmaamo faa'iidooyinka laga helo akhriska.

## 2. AKHRISKA DHAWAAQA AH.

Waxa uu dawo u yahay ogaanshaha la ogaanayo in ardaydu si sax ah oo hagaagsan u akhriyi karaan casharka iyo in kale, qaarkood ama wadar ahaanba. Iyo in laga hubiyo in ardaydu isticmaalka iyo ku adeegsiga astaamaha afka la qabsadaan iyo in kale. Waana in baruhu dariiqooyinka soo socda raacaa:

1) In ardaydu isu diyaariso akhriska mawduuca iyo xiiso gelinta mawduuca.

2) Far ardaydu in ay marka hore ku bilaabaan akhris aamusan waqti munaasib ah si ay uga bogtaan macnaha guud ee casharka.

3) Hadda bilow akhriskii ku dhawaaqa ahaa, adiga oo marba arday faraya inuu akhriyo hormo ama nud (farqad) casharka ka mid ah ilaa iyo inta casharku dhamaanayo.

4) Baruhu waa in aanu ardayga hakinin marka uu qalad dhinaca ku dhawaaqa casharka saeeyo, ha sugoilaa iyo inta uu dhammaynayo, marka ha ku dhawaaqo inuu ardayga saxo oo u tilmaamo qaladaadkiisa.

5) Ka dib marka ay dhameeyaan ayuu baruhu u jeedinayaa ardayda su'aalo uu u diyaar ahaa, si uu ula falanqeeyo macnaha fikradda, odhaahaha, weedhaha, ereyada ee u baahan in la saxo.

6) Haddii casharku yahay mid ku habboon jilid, waa inuu baruhu u horseedo ardayda inay jilaan.

7) Ugu dambayn baruhu si looga faa'iidaysto casharka, inuu ardayda siiyo laylisyo la xidhiidha casharka oo qoraal ah.

DHEGEYSIGA.

Ujeeddada laga leeyahay waxay tahay, in ardaydu tababar ku filan u helaan dhinaca fahamka casharka iyo ka buuxsiga macnaha. Inuu ardayda ku beero; kuna layliyo feejignaan dhinaca dhegeysiga iyo qabsashada wixii ay maqlaan ee dani ka hayso.

Baruhuna ardaydiisa sidatan ayuu u layliyaa:

1) In baruhu ama ardayba uu akhriyo buug ama qoraal kale, iyada oo ay ardaydu si feejignaan

ah u dhegeysanayaan, iyaga oo aan haysan wax la akhriyo haba yaraatee. Markaa ka dib waxa bilaabmaya su'aalihii iyo dooddii.

2) Baruhu ha faro ardayba ama in ka badan in ay soo diyaariyaan casharka fasalka dibadda ka ah, dabadeedna lagu dhaqmo akhris dhegeysi, ardayda horteeda, baruhuna la qaadaa dhigo ardayda fikradaha iyo macnaha cahsaka.

3) Baruhu ardayda ha ugu akhriyo sheeko munaasib ah fasalka, ka dibna ardayda qaarkood ha faro in ay dib uga sheekeeyaan dhammaanteed, si baruhu ku ogaado ilaa iyo inta ardaydu kala socdeen iyo sida au ugu dhego taagayeen waxyaalaha sheekadu ku socotay. Ha la falanqeeyo ardayda hana ku amro inay qoraan.

DHIGISTA SHEEKADA.

Baruhu marka uu dhigayo sheekada, waa inuu maskaxda ku hayaa qodobada hoos ku qoran:

1) Deriska cusub waa inuu ka bixiyaa hordhac kooban, oo ardayaga ku baraarujinaya kuna toosinaya casharka.

2) Waxa habboon sheekada inay marka hore ardaydu hoos u akhrido, marka dambena baruhu ka daba maro.

3) Marka uu baruhu dhammeeyo, waa inuu sharaxaa ereyada adag iyo hadalada maldahan.

4) Waa in baruhu ardayda la falanqeeyo dulucda sheekada, figta sheekada, dhammaadka iyo ashkhaasta sheekada ku jirta xidhiidhka ka dhexeeya.

## CASHAR QORSHAYN.

TUSAALE:

### SHEEkO

### LAX INDHALA'. (CASHARKA 5AAD)

UJEEDDADA:

Sheekadu waxay u janjeedhaa dhinaca maaweelo iyo qosol, taas oo muujinaysa fulannimada waraabaha, iyo iyadoo ku tusinaysa in bahaluhu sidoodaba cunid-dooda ku soo dheereeyaan wixii ka baqa, kana orda, waayo haddii laxdu horaantiiba waraabaha, markii ay sanqadhiisa maqashay carari lahayd, wuu eryan lahaa dabadeedna wuu cuni lahaa.

HORDHAC:

Sheekadani waxay ka hadlaysaa arrin kala qabsa tay lax indho la', iyo waraabe damcay inuu cuno, hase yeeshee aan ku guulaysan (waa dhurwaagii kudmada doontay ee isagii la kuday).

AKHRISKA KOWAAD:

Waa in markan macallinku sheekada ardayga kor ugu akhriyo, uguna akhriyayaa si xiisahooda uu u soo jiito, maaweelana ku dheehan tahay.

AKHRISKA LABAAD:

Baruhu markan ardayda ha siiyo fursad ay cashar-ka ku akhriyaan, mid aamusan oo iimo la', iyagoo isku

dayaya inay si buuxda casharka u fahmaan, una dhuuxaan macanihiisa guud iyo ujeeddooyinkiisa gaar ahaaneedba. Wixii ereyo ah, odhaaho, hadal maldahaneed ah ee ku adkaadana la kaashanaya baraha iyagoo mid mid farta u taagaya.

SHARAXA:

Intaa ka dib waa inuu macallinku u yimaadaa su'aalaha ardaydu ka qabto sheekada ee la xidhiidha waxa allaale iyo wixii iska hortaagaya fahamka wanaagsan ee sheekada sida, ereyo cusub, odhaahii af-maldaheedka, maahmaahyada, halxidhaalayaasha iwm. ee ay u arkaan inay sharax u baahan yahay.

Tusaale ahaan, odhaaha «Naftu waa mallayee . . .» oo ah: Naftu waa macaantee . . .

LAYLISYO:

Ka bacdi marka uu macallinku dhammeeyo sharaxa iyo falanqaynta sheekada, waa inuu u yimaadaa laylisyada, ha ahaadaan qaar uu isagu soo diyaariyey ama kuwa sheekada la xidhiidha ee buugga.

Weydiimuhu waxay u kala baxayaan kuwo hadal ah (oral) iyo kuwo qoraal ah. Su'aalaha hadalka ah ee baruhu ardayda u jeedinayo, isagoo mid walba fursad siinaya, si uu u ogaado meelaha faah-faahin iyo sharax dheeraad ah u baahan.

Layliska qoraalka ah oo noqon kara midka sheekada iyo in kale oo macallinku ku daraba, waxa lagaga shaqaynayaa fasalka gudihiisa, inta la dhammeyn waayana, shaqo guri ayuu u siinayaa.

Marka ay soo dhammeeyaan, baruhu waa inuu ka saxaa ardayda laylisyada si joogta ah.

DHIGISTA MAANSADA.

Maansada marka uu baruhu dhigayo waa inuu fiiro gaar ah siiyaa qodobadan hoos ku qoran:

1) Marka ugu horeysa waa inay maansadu heerka ardayga iyo waayo-aragnnimadiisa la da' noqotaa.

2) Jaad kasta oo maanso ah marka la akhriyayo waa in ardayga lagu baraarujiyaa inuu mar in ka badan akhriyo, si uu u dhuuxo fikradda maansada ku jirta.

3) Maansada marka la akhriyayo waa in lagu dhawaaqaa.

4) Ardayda waa in lagu dhiirri geliyaa inay gartaan ereyada adag ee hadba jaadka maansada uu baranayaa ay ka kooban tahay.

5) Ardayda waa in lagu dhiirri geliyaa inay hadba maansada jaadka ay ka baranayaan luuqada gaarka ah ay leedahay si qumman ugu dhawaaqaan.

6) Waa inay ardaydu maansada mar mar ku luu qeeyaan.

7) Maansada si loo garto waa in la isweydiiyaa:

b) Cidda marba hadlaysa iyo munaasabada laga hadlayaa waxay tahay.

t) Dulucda maansada oo ah ujeeddada kooban ee guud, waxay tahay waa in la gartaa.

j) Tabta ama sida dulucda lagu gaadhayo waa in la gartaa.

x) Waxa habboon maansada marka la akhriyayo bilowga ilaa dhammaadka inay ardaydu xagga

maskaxda aad uga feejignaadaan, oo aanay wax kale ka soo dhex gelin.

## DHIGISTA GABAYGA.

Gabaygu ha ku biláabmo farxad, ha kuna dhamaado xikmad.

1) Gabayga kor u akhri. Sidatani waa sida ugu fiican ee gabayga loo soo qaddimo ama loo soo bilaabo.

2) Akhriska labaad baruhu ardayda ha ka sugo inay soo saaraan wixii ku adag; ka bacdina ha sharxo isaga oo la kaashanaya sida ay meesha ugu jiraan.

Ha ogaado baruhu in gabayaagu xambaarsan yahay sheeko (sifo ama fikrad qof), oo tiraab ahaan lagu sheegi karo.

3) In baruhu gabayga ku Luuqeeyo ama arday si fiican ugu Luuqeeya u dhiibo, ardayduna dhegta u jalqiyaan, laabtana ka macaansadaan.

4) Su'aalo ku saabsan gabayga, sida:

b) Muxuu u qoray (danta uu ka lahaa)?

t) Xaggee (setting)?

j) goorma?

x) Ujeeddada (muxuu inna dareensiinayaa?

kh) Ka doodista nolosha iyo qoraalada gabayaaga.

d) Maxaad ka odhan kartaa fikraddiisa iyo qaabkiisa (style?

r) Fahamka macnaha guud.

CASHAR QORSHAYN.

TUSAALE:

GABAY.

CASHARKA KOWAAD (XANNAANADA XOOLAHA.)
UJEEDDO

Gabagu wuxuu yahay in ardayda lagu baraarujiyo xannaanada iyo daryeelka xoolaha, sida; Geela, Lo'da, Adhiga iwm. In xooluhu yihiin tiirka dhaqaalaheenna ugu weyn, nolosha ummaddeennuna ku tiirsan tahay mid miyi iyo magaaloba.

HORDHAC AMA GOGOLDHIG:

Cidda gabayga tirisay, sababta loo tiriyey, munaasabadda dulucdiisa iwm. Tusaale ahaan wuxuu baruhu ku bilaabi karaa sidatan, gabayga oo aan ujeeddadiisa ka hadalnay nidhina waa dhaqaalaynta iyo wadeeco ka ilaalinta xoolaheenna, si ay u kordhaan tiro iyo tayaba, waxa tiriyey nin la yidhaahdo Ciise Maxamed Faarax, kuna dhashay magaalada Laasqoray ee Gobolka Sanaag ee dalkeenna.

Ujeeddooyinka laga leeyahay buugga Fasalka

AKHRISKA KOWAAD:

In baruhu u akhriyo ardayda isaga oo ku luqaynaaya (intii suurtagal ah) ardayduna dhegta maalayso.

AKHRISKA LABAAD:

Akhriska hore ka dib, in ardaydu marka si aamusan u akhriyaan, si ay u fahmaan una dhuuxaan murtida ku jirta gabayga, tiisa guud iyo ujeeddada ka hoosaysa. Inay ka soo saaraan wixii ku adag dhinaca ereyada, odhaahaha, hadal maldaheedka iwm.

SHARAXA:

Baruhu ha soo qaato kolba hal meeris oo ka mid ah meerisyada gabaygu ka kooban yahay, ha una sharax tiraab ahaan.

MASALAN:

B. Macnaha ereyada iyo odhaahahaa adag ee meerisyada ku jira.

Masalan:

B. Macnaha ereyada iyo Odhaahaa adag ee Meerisyada ku jira:

Xagal daac : wadeeco, humaanta
Xaasil : Faa'iido, raandhiis
Xurmeeyo : lagu dadaalo, la weyneeyo
Xayn : Xoolo tiradoodu kooban tahay
Xaabin : Madhin, idlayn
Xaaluf : Daaq la'aan, abaar

T. SHARAXA GABAYGA:

Wadeecada ka dhawra xoolaha nool oo ah xubnaha dhaqaalaheenna, ahna lagama maarmaan. Markay adduunyada ka dhacaan dhibaatooyin, sida dagaallada ee ay magaalooyinku baaba'aan ama xaaladdu

ku xumaato, cuntadu ku yaraato, ee qof waliba hanti wuxuu lahaa ku xeerto, innaga Soomaali ahaan shayga innoo xaasil iyo raanddiis ahi waa xoolaha nool.

Sidaa awgeed, waa in iyaga xannaano dheeraad ah lala ogaado, sida daaq wacan, biyo haqab la'aan ah, daawo iyo wax allaale wixii tiradooda iyo tayadoodaba kor u qaadaya.

Waa in xoolaha laga ilaaliyo wadeecada, dacdarrada, cudurka, daaq yari ku timaada. In laga fogeeyo dhulka xaalufka ah, oomanaha ah ee xoolaha u horseedaya inay yaraadaan, ka dibna dhaqaalaha ummaddaeenu hoos u dhaco. Xilkaa weyni wuxuu garbaha ka saaran yahay cid wal oo ka mas'uul ah dhaqidda xannaanaynta daaweynta, waraabina, ilaalinta iyo raacidda xoolaha si looga badbaadiyo, cudurka, abaaraha iwm.

LAYLISYO:

Sharaxa ka dib waa in baruhu ardayda ka dhegeysto waxay su'aalo hayaan, lana falanqeeyo, si uu macallinku u hubiyo in ay ardaydu gabayga fahmeen macnihiisa guud iyo meeris ahaanba oo ay hadda ka jawaabi karaan weydiimo gabayga la socda iyo kuwa kale ee baruhu ka soo diyaariyey gabayga.

Su'aaluhu waxay u kala baxayaan kuwo hadal ah (oral) iyo qaar qoraal ah. Kuwa hadalka ah waa inuu macallinku u jeediyaa fasalka iyo hal hal oo ay farta u taagayaan, baruhuna jawaabahooda kala dhiman toos toosinaayo. Qaybta weyddiimaha ah ee qoraalka ah waa in baruhu ardayda faraa inay fasalka gudihiisa ku qoraan, haddii uu waqtigu ku simi waayana ay shaqo guri u qaataan. Mar kasta oo ardayda shaqo guri la siiyo, waxa baraha ku waajib ah inuu shaqada ardayda saxo.

## DHIGISTA CURISKA.

Heerkan marka ardaygu soo gaadho, wuxuu soo bartay waxyaabo la xidhiidha qoraalka-curis hadal iyo qoraalba, hase yeeshee waxa dhacda in marka ardaygu ku dhaqaaqo qoraal-curis, inay fikrado badani ku soo dhacaan maskaxdiisa, kuwaas oo aan kala habaysnayn. Haddaba waa in baruhu ardayga ka kaalmeeyaa sidii uu curis u qori lahaa.

Hadda curiska laga rabaa waa mid kooban oo fudud, wuxuu noqon karaa mid ah inuu macallinku ardayga qalinka u qabto, taas waxa loola jeedaa inaa curisku heerkan noqon mid madax bannaan oo ardayga looga kala baxo. Macallinku waa inuu noqdaa hagaha ardayga oo uu had iyo jeer ka kaalmeeyaa ardayga habka bilowga, nudaynta, isku xidhnaanshaha fikradda iyo wixii la mid ah.

Waxaa la filayaa in ardaygu hadda qori karo dhawr nudood (fagradood) oo dhaliil la'. Ardaygu wuxuu taa ku guulaysan karaa marka baruhu tusaalooyin hagaagsan ardayga u hor marsho, dabadeedna ay isku dayaan iyaga oo afkaartooda iyo ereyadooda adeegsanaya.

### CURIS KASTA WAXA U SAL AH:

1) Doorashada ama xulashada mawduuca
2) Diyaarin waxyaabihii curisku ka unkamayo, iyo
3) Ku dhaqaaqa qorista curiska.

### 1. MAWDUUCA:

Waa in ardaygu xushaa midka uu isleeyahay si fiican ayaad uga hadli kartaa, wax xiiso lehna waad ka qori kartaa.

2 DIYAARINTA:

Waa soo ururinta fikradaha isku dubbaridkooda, dhishama guud ee fikradaha (kala hormarintooda dhinaca mudnaanta).

3 QORISTA:

Ku dhaqaaqista curiska kaas oo leh bilow, muc iyo gabagabayn ama dhamınaad, una kala qaybsan nudo, iyo ku noqosho ama nakhtiin oo ah lafagurka mawduuc adhan.

Mar kastaba waxa lagama maarmaan ah in ardayda marka hore macallinku u hore mariyo curisyo fudud oo tusaalooyin ah (Guided composition).

Waa in baruhu ardayga fahamsiiyaa ujeeddada qorista mawduuca curiska. Heerkan curiska baruhu ardaydiisa hor keenayo ha noqdo mid degaanka la xidhiidha, kuwaas oo ah in ardaygu garanayo waxa uu wax ka qorayo, waa inay waayo-aragnnimadiisa ka soo jeedaan.

F.G:

Tusaale curis, ee casharka 19 aad ee buugga fasalka lixaad.

CASHAR QORSHAYN.

TUSAALE:

CASHARKA 10AAD (MAALINTA MACALLINKA-
21 NOFAMBAR.-)
CURIS.

UJEEDDADA CASHARKA:

In ardayga la tusaaleeyo, waxna laga baro habka curiska loo qoro, laysugu dubbarido, waxyaabaha qoristiisa salka u ah.

HORDHAC AMA GOGOLDHIG:

Kaalinta macallinku kaga jiro, kagana jiro hadda iyo waayadii horeba bulsho weynta Soomaaliyeed, xilkiisa, taariikhaha kala duwan ee uu soo maray iyo mar walba kaalinta uu ka qaadanayey. Si kooban haddan u nidhaahno, casharkani wuxuu ku saabsan yahay risaaladda macallinka oo ah la dagaalanka jahliga, faafinta iyo dhiiri gelinta horumarka iyo kor u qaadidda noqoshada, waxbarashada, dhaqanka iyo hiddaha, ilbaxnnimada, diinta islaamka iyo dhaqdhaqaaqyada gumeysiga la dirirka iyo ka dhiidhiyadda xumaanta gumaystayaasha iyo ku baraarujinta dadka Soomaaliyeed inay xornnimadoodau hawl gelaan iwm.

Raggii kaalinta libaax ka soo qaatay waxbarashada ummadda, oo ay ka mid ahaayeen:

— Maxamuud Axmed Cali
— Macallin Jaamac Bilaal
— Sheekh Cali Suufi

AKHRISKA KOWAAD:

In baruhu casharka akhriyo si degganaan ku dheehantahay u muujiyana meelaha nudaha cusubi (new paragraphs) ka bilaabmayaan, meelaha astaamaha leh, sida joogsiga, hakadka iyo astaamaha kale ee casharka ku jira, heerkana loo baahan yahay in fiiro gaar ah la siiyo (eeg manhajka).

AKHRISKA LABAAD:

In ardaydu casharka akhris aamusan akhriyaan, iyagoo waqti go,an oo ku filan baruhu siinayo, ilaalinayana.

SHARAXA:

Markan macalinku ardayda ha u sharoxo ereyada, odhaahaha iyo wixii kale ee faahfaahin u baahan, iyadoo ereyada loo sharaxayo ama macnahooda loo sheegayo sida ay ugu jiraan meesha oo aan marnaba baruhu isku dayin inuu ereyga mutuxan inta uu sabuuradda ku qoro ka dibna sharaxo.

TUSAALE:

Ereyga dhalaalay keli ahaantii wuxuu yeelan karaa macnayaal badan, sida subagii waa dhalaalay hase yeeshee marka aynu fiirino macnaha ay leedahay marka ay casharkan ku jirto nudda (3aad) oo ah:

Macallinku wuxuu ka soo dhalaalay kaalintiisii; macnaha ereybu wuxuu noqonayaa waa gutay ama ka soo baxay.

LAYLISYO:

Waa in macallinku ardayda siiyo tusaalooyin uu ka qaadanayo casharka, habka loo bilaabay, fikradaha

mudnaan ahaan loo kala hormarshay, nudayntooda, isku xidhnaanshohooda iwm.

Layliska tusaalooyinka hadalka marka uu dhammeeyo, waa in macllinku ardayda siiyaa curis ay qoraan iyagu, oo fudud, adeegsadaan casharkii hore, laakiinse ay ereyadooda iyo fikradahooda ay cabbiraan. Baruhu waa inuu ka kaalmeeyaa ardayda sidii ay fikradaha u qorshayn lahaayeen, ka dibna u qori lahaayeen curis dhan, oo uu macllinku ka soo saxo, una tusaaleeyo habka hagaagsan ee curiska loo qoro.

DHIGISTA WARQADA QORAALKA

1. Warqada Bulsheed:

Macllinku ardayda ha u faahfaahiyo marka loo baahan yahay, waxyaabaha ay taabanayso, sida fariin go'an oo ah inay qanciso arrin bulshannimo.

Waxaa lagama maarmaan ah in baruhu ka hadlo lana socodsiiyo ardayda habka warqad bulsheedku raacdo, qaabka iyo qaybaheeda kala duwan, sida:

— Madaxa (Ciwaanka qoraha & ttaariikhda)
— Bariidada
— Mucda (fariinta warqadu gudbinayso)
— Gabagabynta
— Nabad gelynta
— Saxeexa.

WARQADA HAWLEED:

Waa in la ilaaliyo, lagamana tegi karo qaabka iyo qaybaha xeerka ah ee u gaarka ah. Baruhu ha u muujiyo ardayda meelaha ay warqada saaxiibeedka iyo hawleedku ku kala duwan yihiin sida: Madax, Cinwaanka, gudaha, bariidada, mucda gebagabaynta iyo saxiixa.

Macallinku ardayda ha xusiisiyo ha lana socodsiiyo meelaha ay ku kala duwan yihiin Warqad saaxiibeedka iyo Warqad Hawleedku. Waxa kale oo baraha xil ka saaran yahay inuu tusaaleeyo ardayda qaabka cinwaanada loogu qoro galka korkiisa iyo meesha tigidhka loogu talagelay. Waxa intaa raaca in baruhu ardayda tusaaleeyo, una sheego astaamaynta hagaagsan ee qaybaha warqadda lagu isticmaalo.

Baruhu ardayda ha u guud maro, noocyada qoraalka warqadaha ee kala duwan, sida:

1. Warqad rasmi ah (Formal Letters)

2. Mid aan rasmi ahayn (Friendiy Letters)

Waa in baruhu ardaydiisa u kala sheego una kala caddeeyo erey xishmeedyada la isticmaalo iyo Magacyada ay raacaan marka warqad la qorayo, sida: Jaalle, Gacaliyo, Maandhow abbowe, abbaayo IWM.

Macallinku waa inuu noocyada warqadaha tusaalooyinka bixiyaa oo uu Sabuuradda ugu muujiyaa ardayda (intii iyo meeshii suurta gal ahna) ardayda faraa inay galal (Kiish ama baqshad) soo qaataan oo uu layli ahaan, Fasalka gudihiisa ku qoraan, baruhuna kuwareego fasalka kana saxo qaladaadka ay samaynayaan.

F.G:

(Tusaalaha warqad qoraalka, eeg buugga fasalka, Casharka 13aad.)